

Guddoonka Golaha Wasiirrada.

X.W. (Xeer Wasiir) 24 Oktoobar 1961, lamba. 260

Wakaalad la siiyey Wasiir Ku-xigeenka.

WASIIRKA KOWAAD

Markuu akhriyey qodobka 7aad, faqradda labaad, ee Dastuurka;

Markuu arkay Xeer – Sharci 9 oktoobar 1961, lamba. 5;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in Xildhibaan Mudane Maxamed Shekh Maxamed Daahir, wasiir Ku-xigeenka Guddoonka golaha Wasiirrada, loo wakiisho in uu ka hawlgalo arrimaha, saxiixana qoraallada la xiriira hawlaha uu ikhtisaaska iyo awoodda u lahaa Wasiirkii Arrimaha Guud, ee xilka banneeyey.

WUXUU XEERINAYAA

Laga bilaabo 15 Agoosto 1961, Xildhibaan Mud. Maxamed Shekh Maxamed Daahir, oo aqal Wasiir Ku-xigeenka, in uu ka hawlgalo, saxiixana qoraallada la xiriira arrimaha uu ikhtisaaska iyo awoodda u lahaa Wasiirkii Arrimaha Guud, ee xilkaas banneeyey.

Muqdisho, manta oo taariikhdu tahay 24^{ka} Oktoobar 1961.

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Waa arkay waana Diiwaangeliyey

Ku-xigeenka Hanti-dhowrka: **Cali Axmed Cumar**